

Deeq fidin ah tallaalka koroonaha oo la siinayo carruurta-dhallinta jirta da'da 12-15 sano

Carruurta iyo dhallinta jirta da'da 12-15 sano waxaa loogu deeqayaa tallaalka koroonaha. Tallaalka koroonuhu waa ikhtiyaari.

Tallaalka la siinayo dhallinta da'doodu u dhexayso 12-15 sano wuxuu ka koobanyahay hal cirbad-tallaal oo ah Pfizer. Haddii uu koroonuhu ilmahaaga ku soo dhacay, haddan la joogo loogu talinmaayo tallaalkaan.

Oggolaansho qoraal ah

Carruurta iyo dhallinta ka yar 16 sano **waa inay** labada waalid ee haya mas'uuliyadda waalidnimmo ka wataan oggolaansho qoraal ah iyo foomka caddaynta iska-warbixinta oo buuxsan si lagu tallaali karo. Foomamka waxaa loo soo qaadanayaa rugta tallaalka.

Carruurta daryeelkooda ay dawladdu gacanta ku hayso waa inay adeegga dhawrista carruurta ka wataan oggolaansho qoraal ah.

Foomka oggolaanshaha iyo foomka caddaynta iska-warbixinta dhawr af baa lagu helaa: [Samtykkeskjema](#) (Foomka oggolaanshaha) [Egenerklæringsskjema](#) (Foomka caddaynta iska-warbixinta)

Inta badan waxaa laysku tallaalkaa rugta tallaalka degmada Trondheim ee Sluppen, [Sluppen 14](#).

Ballanta sidan ayaad u qabsanaysaa

Waalidka/mas'uulka ama qof kale oo 18 sano ka weyn ayaa tallaalka ilmaha uga dalbi kara <http://minside.trondheim.kommune.no/>. Kolkaa ka dib riix "**korona**" oo dooro "**bestill korona vaksine for andre**."

Waa muhim inuu hal usbuuc u dhexeeyo tallaalka koroonaha iyo tallaalka kale. Tani waxay metelan khusaysaa 12 jir, inta dayrtan lagu jiro loogu deeqo labo tallaalka ee kala ah tallaalka hpv iyo kan koroonaha.

Xaqa loo leeyahay macluumaad laguugu talagalay

Carruurta iyo dhallintu waxay xaq u leeyihiin in la siiyo macluumaad iyo in la dhegeysto kolka la gaarayo go'aanno khuseeya caafimaadkooda. Halkan waxaad ka helaysaa macluumaad dheeraad ah oo ka yimi Machadka caafimaadka dadweynaha oo dhawr af ku qoran:

[Koronavaksine for ungdom 12-15 år](#) - macluumaad kooban oo sawiro wata

[Koronavaksine på 1-2-3](#) - macluumaad guud oo kooban oo wata sawiro

[Tallaal ka warramid](#) - macluumaad dhawr af ku qoran - filimo fudud oo sharraxaya:

- Hva er en vaksine? (Waa maxay tallaalka?)
- Hvordan fungerer vaksiner? (Sidee u shaqeeyaan tallaalkadu?)
- Hvorfor vaksinerer vi oss mot covid-19? (Maxaynu isaga tallaalnaa covid-19?)

[Su'aalo iyo jawaabo ku saabsan tallaalka carruurta jirta 12-15 sano](#) (af norwiiji keliya)